

Xaqiiqda Cudurada Galmada (STD)

Pubic Lice ("Crabs") and Scabies-Som

Injirta Shuunka iyo Cadhada (Isnadaamiska)

(Injirta Shuunka nooca lice-ka waxa keena cayayaanka loo yaqaan *Phthirus pubis*,
nooca crab louse-ka iyo Isnadaamiska waxa keena *Sarcoptes scabiei*)

CALAAMADAHA LAGU GARTO

Calaamadaha Injirta Shuunka iyo Cadhada (Isnadaamiska):

- Cuncun aad u daran
- Mararka qaarkood injirta waxa lagu arki karaa meelaha timaha leh ee jirka intiisa kake

ISU GUDBINTA

Injirta Shuunka iyo Isnadaamiska waxaa Fidiya:

- Galmoodka
- Jirka oo si aad isugu dhaw isu taabta
- Tuwaallada, musqusha meesha lagu fariisto, gogosha, iyo dharka ay injirtu gaartay

DHIBAATOYINKA KA YIMAADA CUDURKAN

Haddii Aan la Daaweeyn:

- Injirtu waxay ka soo fidi kartaa shuunka ayadoo ku fidaysa meelaha kale ee timaha leh
- Xubnaha qoysku way is qaadsiin karaan isnadaamiska

KA HORTAGGA

Talooyin ku saabsan sida loo Yareeyo Fiditaanka Injirta Shuunka iyo Isnadaamiska:

- U tag dhakhtarkaaga si aad baaritaan u samaysid haddii aad ka shakido inaad cudurka qaadday
- Yaree dadka ay galmadu idinka dhaxayso
- Ogeysii dadka ay galmadu idinka dhaxayso isla markiiba haddii aad qaaddo cudurkan
- Dadka ay galmadu idinka dhaxayso waa in ayagana la daaweeyaa
- Iska ilaali inaad qof qaba injirtan la wadaagto sariir ama shukumaan ama dhar

DAAWEYNTA

Daaweynta Injirta Shuunka iyo Isnadaamiska:

- Waxaa lagu dili karaa daawada ku habboon ee dhakhtarku qoro
- Ku dhaq dharka oo dhan iyo gogosha biyo kulul
- Ku nadiifi vacuum alaabta guriga (furniture)
- Is daaweeya isku mar adiga iyo dadka ay galmadu idinka dhaxayso

OGOW: In daawada ka dib qofku dib cudurka u qaadi karo.

WIXII WARAR DHEERAADA, LA XIRIIR:

Infectious Disease Epidemiology, Prevention
and Control Division
STD and HIV Section
Minnesota Department of Health
P.O. Box 9441
Minneapolis, MN 55440-9441
(612) 676-5414; (612) 676-5653 TTY

Khadka Teleefonka ee Qorshaynta Qoyska iyo
Cudurada Galmada (STD) ee Minnesota
(Minnesota Family Planning and STD Hotline)
1-800-783-2287 Teleefonka caadiga ah /TTY

Khadka Taleefonada Hay'adda Qaranka CDC
Qaybta Qaabilsan Cudurada STD iyo AIDS
(CDC National STD and AIDS Hotlines)
1-800-227-8922; 1-800-243-7889 TTY